

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **31/05/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- DURAN ABDULLAHI HOSH, Hooyo: Suuban Falir Ismaaciil, Somali ah, Ku Dhashay: Luuq, Sanadkii: 1/1/1995, Sita: Refugee Identity Card, Lr. RM8-00275191-Uganda

LA WAKIISHE:- SAID MOHAMUD DUALE, Hooyo: Asho Hosh Kheyliye, Somali ah, Ku Dhashay: Galkacyo, Sanadkii: 1/1/1985, Degan Wardhigleey, Sita: Warqad Sugnaan, Lr. 823950, Kana Soo baxday D/Hoose ee Muqdisho

TILMAAMAHA DHULKA

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Wardhiigleey)**, Cabirka: **(20X15)-M**, Looto No: **626-AY**, W.M.L: **(65987/2017)**, Tr. 14/12/2017, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble

SOOHDINTA DHULKA

Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: **Jid**, Waqooyi: Dhul dad

B- Aniga oo ah **DURAN ABDULLAHI HOSH**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **SAID MOHAMUD DUALE** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in hantidaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in SAID MOHAMUD DUALE awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **SAID MOHAMUD DUALE**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey DURAN ABDULLAHI HOSH, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Sharecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

DURAN ABDULLAHI HOSH

Duran



1- ABDI MOHAMED AHMED

Abdi Mohamed Ahmed

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

SAID MOHAMUD DUALE

Saciid



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

2- ABDULLAHI MOHAMED AHMED



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1606/T.P.N/25, Tr. 31/05/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **DURAN ABDULLAHI HOSH** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **SAID MOHAMUD DUALE** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdooda Tamaro ahay Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Dhawanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuql.

NOOTAAYAHA

By: C/qani **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO:- (HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN OO MUNCIPALE AH).

Muqdisho maanta oo ay tariikhdu tahay 14/12/2017, Anigoo ah, Dr.Saciid Cali Cosoble, ahna Notayaha Muqdisho, Xafiiska ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa Xafiiska iigu yimid iyagoo hishiis ah, mudanayaasha hoos ku cad ina weydiistay in aan u kala qoro hishiiskooda hoos ku cad:-

1-)Aniga oo ah Cabdi Axmed Cilmi "Shiino" Waxaan Heshiiskan ku cadaynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyay kuna wareejiyay Duraan C/laahi Xoosh Qeyliye Boos banaan oo ay ku qoran tahay Fartuun Saciid C/raxmaan Saciid, Booskaan oo aan ku gaday Warqada Wakaalada Tix Lam.DIW/AA/171215/17, Tr,11/December/2017, Kana Soo Baxday Xafiiska Qareenada CNA/Solicitors. Oo Ku Yaal London Uuna Saxiixay Madaxa Xafiiska Cabduraxmaan Axmed-nuur Cali, Laguna Xaqiijiyay 1-)Rep.65973/2017, Tr,13/12/2017, Kana Soo Baxday Isla Xafiiskan, iyo 2-)LAM.692/2017, Tr,13/12/2017, Kana Soo Baxday Maxkamadda Racfaanka ee Gobalka Banaadir, Booskaan ku yaal Xamar Degmada (Wardhiigleey), Lehna W.M.L.19379/2013, Tr,16/02/2013, Kana Soo Baxday Nootaayo Muqdisho Uuna Saxiixay Dr, Maxamed C/qaadir Sh, Xasan, Booskaan oo cabirkiisu dhan yahay (20X15-M), Lotto Lr. (626-AY), Soohdimihiisuna kala yihiin Galbeed waxaa ka mara Jid, inta kalane waxaa ka xiga dhul dad, Lehna nullo oste ku lifaaqan warqadaan, Wuxuuna wakiilka iibsadaha booskaan iiga iibshay lacag dhan USD. 22,500/\$.(Labaatan iyo Laba Kun iyo Shan Boqol oo Dollar oo aan lacagtaas wada qaatay), Waxaa kale oo aan caddaynayaa in booskaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale iyo waxkasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee laxiriira isla booskaan, Wixii taariikhda sare ka bilowdana booskaan milkiyadiisa faa'iidadiisa iyo waajibaadkiisa canshuureedba wuxuu u wareegay (Duraan C/laahi Xoosh Qeyliye).

2-)Aniga oo ah Cabdi C/laahi Xoosh, Ahna wakiilka iibsaddaha lagu magacaabo Duraan C/laahi Xoosh Qeyliye, Somali ah, Ku Dhashay Luuq, Sanadkii 1987, Kii, Degan "Nairobi" Hooyadiisna la yiraahdo Suuban Falir Ismaaciil, Waxaan Heshiiskan dhankayga ku caddaynayaa in Cabdi Axmed Cilmi "Shiino" igu wareejiyay booskaan uu sare uga soo hadlay oo waxba dhimanayn lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan u gudoomay iibsadaha una saxiixay kaalintiisa Heshiiskan.

SAXIIXA IIBIYAHA.

Cabdi Axmed Cilmi "Shiino"

[Signature]

1-)C/laahi Jaamac Maxamed.

Rep. 65987/ 2017

SAXIIXA WAK. IIBSADAHA.

Cabdi C/laahi Xoosh.

[Signature]

2-)Cali Axmed Cawaale.

SAXIIXYADA MARQAATIYAASHA

(CADDAYNTA XAFIISKA NOOTAAYAHA)

Tr. 14/12/2017

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr.Saciid Cali Cosoble waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-) Cabdi Axmed Cilmi "Shiino" Somali ah, Ku Dhashay Cadale, Sanadkii 1951, Kii, oo sita National Id No.25102208273399, Hooyadiisna layiraahdo Faadumo Faarax Cigaal, Ahna (iibiye), 2-) Cabdi C/laahi Xoosh, Degan "xamar" Ahna (wakiilka iibsadaha), iyo waliba labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsaday hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin heshiiskan igula saxiixeen xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

By Madaxey.



NOOTAAYAHA
(Dr.Saciid Cali Cosoble)



*Waa la di Waan
Galiyay Waan
Maga Waree
Shiyo Mhul*

17/12/2017



FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 05/06/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Saciid Maxamuud Ducaale** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1606/T.P.N/25, Tr. 31/05/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Saciid Maxamuud Ducaale
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X15
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Wardhiigleey
Lotto Lambar	626-AY
W.M.L	65987/2017, Tr. 14/12/2017 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Wakaalada	31/05/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **Saciid Maxamuud Ducaale**, Leh Tel No. **0615915160** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Saciid Maxamuud Ducaale

Saciid